

# Qurxinta Maqaarka – Waxqabad Sare

[ridgewater.edu/advancedesthetics](http://ridgewater.edu/advancedesthetics)

## Barnaamijka

Ma shaqeysaa saloon heer sare ah, berkada maalintii, ama goob (medi-spa)? Dhawaan ma ka qalinjabisay Daryeelka Maqaarka (Estheology) oo ma dareentay in aad diyaar u tahay tallaabada xigta? Horumari xirfadahaaga si aad macaamiisha ugu sameyso daawayn/qurxin dheeraad ah. Macaamiil aad iyo aad u farabadan ayaa codsada qurxin khaas ahaan loogu sameeyo, daaweyn/qurxin ka hortag iyo sixid ah. Waxyalaahaani waxay caawiyaan wax ka qabashada baahiyaha daryeelka maqaarka ee shakhsii ahaaneed si ay dib ugu soo nooleyaan maqaarka una horumariyaan caafimaadka iyo muuqalka.

Ridgewater waxa ay balaarisay barnaamijkeeda Esteology si ay u buuxiso baahiyaha loo qabo khubarada shatiga leh ama xirfaqyaqaanka isqurxinta ee haysta shahaado Sare ee Daryeelka Qurxinta Maqaarka.

Baro siyaabo dhammaystiran oo loo maro qurxinta maqaarka oo heer sare ah iyadoo la adeegsanayo manhajka Machadka Qurxinta Maqaarka ee Mareykanka (American Institute of Esthetics curriculum):

- Habka cirbadaha-maqaarka ee miinta iyo boogaha finanka lagu daweeyo
- Xiiidda lakabka sare ee maqaarka
- Qurxinta maqaarka
- Dib-u-soo-noolaynta maqaarka wejiga
- Daawaynta iftiinka
- Daawaynta la istiicmaalo koronto hoose
- Kiimikada diirkha lagu xalo - mid yar ilaa mid dhedhexaad ah
- Nidaamyada daawaynta ee horumarsan
- Daawaynta caafimaad kahor iyo kadib
- Farsamooyinka duug-duugista/riixriixa ee sare oo ay ku jiraan dejinta bararka
- Xanuunada maqaarka/ ereybixinta caafimaadka
- Spa iyo daaweyn kale

## Astaamaha Gaarka ah ee Barnaamijka

- Loo-shaqeeyayaashu waxay raadiyaan ardayda xirfadda leh ee ka qalinjabisay Ridgewater
- Ridgewater Salon iyo Day Spa waxay bixiyaan tababar waayo-aragnimo gacanta wax laga qabanayo ee adeegyada ay qabanayaan ardaydu
- Jadwal dabacsan - 2 maalmood/toddobaadkii oo kaliya oo kambaska la imaanayo si looga caawiyo qofka wada qabashada howlaha qoyska iyo kuwa shaqadaba
- Shaqaale khibrad u leh shirkadaha hadda shaqeeya lana heysta/socda isbeddelladii ugu dambeeyay



Campus-ka (Xarunta) Willmar

Fahamkaaga qotadadheer iyo waayo-aragnimadaada qurxinta maqaarka ugu sii gudub heerka ku xiga adigoo isticmaalaya fahamkaaga maqaarka oo sare, mashiinka nadiifinta maqaarka, iyo waxkale oo badan.

Tababar xirfadahaaga cusub ah ayaad ku qaadan doontaa goobta, ardayda ee Ridgewater Salon iyo Day Spa iyo sidoo kale inta lagu jiro waayo-aragnimo hellida bukaan-socodka ee shirkadaha aan wada-shaqeyno. Barnaamijkeena Ridgewater wuxuu kuu diyaarinayaan inaad qaadato imtixaanada Advanced Practice (Howlaha Sare) ee looga baahan yahay shatiga gobolka Minnesota.

## Macluumaadka Xirfadda

Baahida loo qabo alaabaha iyo adeegyada qurxinta maqaarka darteed, oo ay sii weheliso macaamiisha xirfada shaqo ee saaloonka oo sii kordhaysa, ayaa la saadaaliyay kobaca shaqada bartamaha Minnesota ee takhasuslaha daryeelka maqaarku in ay tahay 7.6% sanadaha 2018-2028 iyo ku dhowaad 11% Maraykanka.

Xigasho: [careerwise.minnstate.edu](http://careerwise.minnstate.edu)

## Shahaadooyinka

Qurxinta Maqaarka ee Sare  
AAS Degree - 60 dhibcood  
Sartifikeedka - 20 dhibcood

 MINNESOTA  
BOARD OF COSMETOLOGY

Kulliyadda Ridgewater waxay shati ka heysataa Minnesota Board of Cosmetology (Guddida Cosmetology-ga ee Minnesota). Barnaamijyada Estheology (Daryeelka Maqaarka) iyo Advanced Esthetics (Qurxinta Maqaarka Sare) waa ansixiyay guddiga.

## Ballan u samayso Booqasho & Codso Maanta!

[ridgewater.edu/visit](http://ridgewater.edu/visit)  
[ridgewater.edu/applynow](http://ridgewater.edu/applynow)

Galay Kaalinta #1 ee Kulliyadaha Bulshada ee Minnesota iyo 20ka Ugu Sarreya Maraykanka, 2020 & 2021 [niche.com](http://niche.com)

## Barnaamijyada La Xiriira

Qurxinta  
Daryeelka Maqaarka  
Tiknoolajiyada Ciddiyaha



**RIDGEWATER**  
COLLEGE

Xubin katirsan Gobolka Minnesota

Ridgewater College waa tallaabo xaqiijin ah, shaqo bixiye iyo waxbare fursado loo simanyahay. Dukumintigaan waxa lagu heli karaa qaabab kale oo loogu talagalay shaqsiyaadka naafada ah; macaamiisha qaba naafonimada maqalka ama hadalka ayaa nagula soo xiriir kara iyagoo adeegga Lalisk ee ay Doortaan. 12/2021 P361

Waxaa la turjumay Febrayo 2023; Si aad u hesho macluumaadka barnaamijyada hadda, boqo ridgewater.edu oo ka dooro Turjumaha luqada Soomaali.

# Esthetician: Advanced Practice

[ridgewater.edu/advancedesthetics](http://ridgewater.edu/advancedesthetics)



Willmar Campus

## About the Program

Do you work in an upscale salon, day spa, or medi-spa environment? Have you recently graduated from Estheology and feel ready for the next step? Advance your skills to provide clients additional treatments. More and more clients request customized, preventive and corrective treatments. These help address individual skincare needs to revitalize skin for improved health and appearance.

Ridgewater has expanded its Estheology program to meet the needs of the practicing licensed esthetician or cosmetologist with a new Advanced Esthetics program.

Learn a thorough approach to advanced esthetics using the American Institute of Esthetics curriculum with:

- skin-needling
- dermaplaning
- microdermabrasion
- hydrafacial
- light therapy treatments
- microcurrent
- chemical peels – light to medium depth
- advanced treatment protocols
- pre- and post-medical treatments
- advanced massage techniques including lymphatic drainage
- skin disorders/medical terminology
- spa and alternative therapies

## Program Distinctions

- Employers seek Ridgewater's skilled graduates
- On-site Ridgewater Salon and Day Spa provides hands-on, experiences with services performed by students
- Flexible schedule – just 2 days/week on campus to help juggle family and work
- Industry-experienced staff are current with the latest trends

Take your in-depth understanding and experience in esthetics to the next level with advanced skin physiology, machine exfoliation, and more.

You will practice your new skills in the on-site, student Ridgewater Salon and Day Spa as well as during clinical experiences with industry partners. Our Ridgewater program prepares you to take the Advanced Practice examinations needed for licensure in the state of Minnesota.

## Career Info

Due to the demand for esthetic products and services, along with growing clientele in the salon industry, projected central Minnesota job growth for skincare specialists is 7.6% for 2018-2028 and nearly 11% in the US.

Source: [careerwise.minnstate.edu](http://careerwise.minnstate.edu)

## Degrees and Certificates

Advanced Esthetics

**AAS Degree** – 60 credits  
Certificate – 20 credits

 **MINNESOTA**  
BOARD OF COSMETOLOGY

Ridgewater College is licensed by the Minnesota Board of Cosmetology. The Estheology program is board-approved; the Advanced Esthetics program is pending board approval.


## Schedule a Visit & Apply Today!

[ridgewater.edu/visit](http://ridgewater.edu/visit)  
[ridgewater.edu/applynow](http://ridgewater.edu/applynow)

Ranked Minnesota's #1 Community College and US Top 20, 2020 & 2021 *niche.com*

## Related Programs

Cosmetology  
Estheology  
Nail Technology



**RIDGEWATER**  
COLLEGE

A Member of Minnesota State

Ridgewater College is an affirmative action, equal opportunity employer and educator. This document is available in alternative formats to individuals with disabilities; consumers with hearing or speech disabilities may contact us via their preferred Telecommunications Relay Service.

2/2023 P361